# Haynta iyo Burburinta Diiwaannada Waxqabadyada Dhallaanka (Early Intervention, EI)

Adeeg bixiyahaaga EI ayaa looga baahan yahay inuu haysto diiwaannada EI ee ilmahaaga illaa dhalashada sagaalaad ee cunuggaaga. Daryeel bixiyaha EI wuxuu kaydin karaa diiwaanka EI ee cunuggaaga in ka badan intan haddii aadan codsanin in la baabi'iyo diiwaannada kadib dhalashada sagaalaad ee cunuggaaga.

EI waxay kaysan kartaa diiwaan joogto ah oo ku saabsan magaca cunuggaaga, taariikhda uu dhashay, xogtaada xiriirka, magacyada Isku-duwayaasha adeegga EI iyo daryeel bixiyaasha la shaqeeyay qoyskaaga, iyo xogta ka bixitaanka barnaamijka (oo ay ku jiraan sanadka iyo da'da ka bixitaanka, iyo barnaamij kasta oo uu ilmuhu galo kadib marka uu ka baxo) iyadoon jirin waqti xadidan.

Si aad u hesho hagid dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqaha diiwaanada cunugaaga ee EI, la xadhiidh DCY ood kala xariiri karto ei@childrenandyouth.ohio.gov. Si aad u hesho hagid dheeraad ah oo la xadhiidha Sharciga Xuquuqda Waxbarashada iyo Qarsoonaanta Xogta Qoyska (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA), la xariir Xafiiska U hogaansanaanta Qoyska ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka oo lambarkoodu yahay 202-260-3887.

# Xallinta Khilaafaadka

Haddii aadan ku qancin waxyaabo la xariira EI, waxaa jira qaabab badan oo lagu xallin karo. Qaabka ugu fudud uguna dhakhsaha badan ayaa ah in lala shaqeeyo barnaamijka EI ee deegaankaaga iyadoo loo marayo iskuduwaha adeegga EI ama maamulaha qandaraaska EI ee degmadaada si loogu helo xal khilaafaadka.

Xogta xidhiidhka Iskuduwahaa Adeegga EI waxaa laga helayaa buug yarahaan. Webseedka EI ka hel xoga dheeraad ah oo ku saabsan hogaamiyaashaada barnaamijka EI ee deegaanka: ohioearlyintervention.org.

Haddii aad doorbideyso inaadan la shaqeyn barnaamijka EI ee deegaankaaga, la xariira shaqaalaha DCY oo aad kala xariiri karto ei@childrenandyouth.ohio.gov.

Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa DCY waxaadna ka codsan kartaa waaxda inay baarto cabashada, dhexdhexaadiso, ama qabato dhageysi caddaalad ah. Cabashadaadu waa inay tahay mid qoraal ah oo saxiixan. Waa inay kujirtaa qeexitaan ku saabsan wixii dhacay iyo sharciyada ama xuquuqaha lagu xadgudbay.

Cabashooyinka waa in loo diraa:

Ohio Early Intervention
Ohio Department of Children and Youth
P.O.Box 183204
Columbus, Ohio 43218

# Baaritaan

Haddii aad dooneyso in DCY baarto cabashadaada, waaxdu waxay kaa codsan doontaa macluumaadka adiga iyo bixiyahaaga EI, waxay dib u eegis ku samayn doontaa dhammaan macluumaadka la xiriira, waxayna gaari doontaa go'aan kama dambeys ah oo qoraal ah oo ay ku gaari doonto 60 maalmood gudahood oo ku saabsan inay jiraan iyo in kale xadgudubyo loo geystay xuquuqdaada ama Xeerarka EI. Go'aanka kama dambeysta ah waxaa ka mid noqon doona macluumaadka ku saabsan waxa DCY qabatay iyo waxa ay sameyn doonto si loo saxo wixii dhibaatooyin ah.

# Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadintu waa u ikhtiyaari adiga iyo adeeg bixiyahaaga EI. Haddii aad dooneyso inaad adeegsato dhexdhexaadin uuna aqbalo bixiyahaaga EI inuu ka qaybgalo, DCY waxay bixin doontaa dhexdhexaadiye xirfad leh oo dhexdhexaad ah si uu ula socdo nidaamka. DCY ayaa bixisa khidmada dhexdhexaadiyaha, dhexdhexaadintuna waa inay noqotaa mid ka dhacda goobaha iyo waqtiyada ku habboon ka qaybgalayaasha.

# Dhageysiga Nidaamka Caddaalada ah

Dhageysiga nidaamka xaqsoorka waa nidaam rasmi ah. Waxaad shaqaaleyn kartaa garyaqaan si uu kuu metelo, laakiin qasab kuguma ahan. Dhageysiga nidaamka xaqsoorka, sarkaalka dhageysiga nidaamka xaqsoorka ayaa dib u eegis ku sameyn doona cabashada, dhageysan doona ka qaybgaleyaasha, dib u eegaya macluumaadka dheeraadka ah, oo bixin doona go'aan qoraal ah 30 maalmood gudahooda oo laga soo bilaabaayo markii cabashada la helay. DCY ayaa bixisa kharashka sarkaalka dhageysiga nidaamka xaqsoorka, dhageysiguna waa inuu ahaadaa mid ka dhaca goobaha iyo waqtiyada ku habboon kaqaybgalayaasha.

Booqo ohioearlyintervention.org/federal-and-state-regulations si aad wax badan uga ogaato Xeerka Waxbarashada ee Shaqsiyaadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA) iyo qawaaniinta gobolka ee barnaamijka EI ee Ohio.

**Iskuduwahayga adeegga EI:**

**Macluumaadka Xiriirka:**

Department of Children & Youth

Mike DeWine, Gudoomiyaha Gobalka Ohio

Kara B. Wente, Agaasimaha
Waaxda Carruurta iyo Dhallinta
(Waxaa dib loo eegay 07/2024)

Ururkaan waa bixiye iyo urur bixiya fursado loo siman yahay.



# Xaquuqaha Waalidka

Department of Children & Youth

Help Me Grow Early Intervention

## Hordhac

Waalidiinta dhalay carruurta ku jira Wax qabadka Hore (EI) waxay leeyihiin xuquuq iyo ilaalino fara badan marka loo eego Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA).

Waaxda Carruurta iyo Dhallinta (DCY) iyo iskaashatadeena deegaanka ayaa ka wada shaqeeya nidaamka EI ee Ohio waxayna masuul ka yihiin hirgelinta xuquuqaha iyo ilaalinada. Intooda badan waxay codsadaan xitaa haddii ilmahaaga la ogaado in aanu u qalmin EI.

Buug yarahaan wuxuu siinayaa qoyskaaga macluumaad ku saabsan xuquuqahaas iyo ilaalinadaas iyo sidoo kale waxa la sameeyo haddii aad dood ka qabtid wax ku saabsan EI. Foomamka loo adeegsaday EI waxay si faahfaahsan u sharaxayaan xuquuqahan iyo ilaalinadaan. Intaas waxaa sii dheer, Iskuduwaha adeeggaaga EI ayaa sidoo kale sharaxi doona oo ka jawaabi doona wixii su'aalo ah ee aad qabtid.

## Ogeysiiska Qoraalka ah ee Hore iyo Oggolaanshaha

Waxaad heli doontaa macluumaad kusaabsan waxqabadyada qaarkood kamid ah ee uu bixiyay nidaamka EI waqti hore laguna bixiyay qoraal. Tani waxaa loo yaqaan “ogaysiis hore oo qoraal ah.” Ogaysiiska hore ee qoraalka wuxuu ku siinayaa waqti aad ku go'aansato haddii aad dooneyso inaad gasho waxqabad gaar ah. Haddii aad dooneyso inaad billoowdo hawl hadda, waxaad ka tanaasuli kartaa waqtiga sugitaanka. Marka aad go'aansato inaad gasho waxqabadyo, waxaad oggolaanshahaaga ku bixin doontaa qoraal.

Ruqsaddaan  waxaa loo yaqaan "oggolaansho bixin." Oggolaanshahaagu waa ikhtiyaari waadna ka laaban kartaa waqtiga aad rabto. Nidaamka EI-ga wuxuu hubin doonaa in su’aalahaaga ku saabsan waxqabad kasta laga jawaabay ka hor inta aadan bixin oggolaanshaha. Fadlan weydii Iskuduwahaaga adeegga EI ama qof kasta oo kale ee kaala shaqeeya EI wixii su'aalo ah oo aad qabto. Ogaysiiska hore ee qoraalka ah iyo ogolaashaha ayaa quseeya

- baaritaanada kobaca;
- qiimeynada ilmaha;
- qiimeynada qoyska iyo ilmaha;
- go'aaminta u qalmida; iyo bilaabida ama badelida adeegyada la xariira Qorshahaaga Adeegga Qoyska ee Gaarka ah (Individualized Family Service Plan, IFSP).

Waxaad heli doontaa ogaysiis hore oo qoraal ah markasta oo adeeg kujira IFSP-gaagu dhammaado ama aad ka baxdo EI.

Xaaladaha qaarkood kuma lug yeelan doonaan ogaysiiska hore ee qoraalka ah, laakiin oggolaanshahaaga ayaa wali loo baahan yahay ka hor inta aan nidaamka EI uusan buuxin tallaabooyinka qaarkood.

Nidaamka EI waa inuu helaa oggolaanshahaaga ka hor:

- inta aan xogta qoyskaaga lala wadaagin meel ka baxsan nidaamka EI, oo ay kujiraan dhakhtarkaaga cuntada; qabashada kulan lagu qorsheynaayo kalaguurka; ama
- u adeegsiga caymiskaaga guud ama kan gaarka ah si loogu bixiyo adeegyada EI.

Waa muhiim inaad ogaato in loo baahan karo qiimeyn si loo oggaado u qalmida cunugaaga iyo in qiimeynta cunugaaga muhiim tahay ka hor inta aan laguugu adeegin nidaamka EI. Haddii aadan oggolaan qiimeynta ama baaritaanka lagu sameynaayo ilmaha, cunugaaga looguma adeegi doono nidaamka EI.

## Diiwaanada EI iyo Xogta Qarsoon

Sababo la xariira in nidaamka EI kujiraan xog adiga iyo cunugaaga ku saabsan, waxaad leedahay xuquuqo la xariira diiwaanada lagu hayo nidaamka EI. Diiwaanadaan waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan diiwaanka cunugaaga ee EI oo ay kujiraan xog ku saabsan qiimeyn iyo dib u eegista, xogta caafimaadka ee la xariirta u qalmida EI ee cunugaaga, adeegyada lagu bixiyo IFSP, nuqulada ama foomamka EI ee asalka ah ee aad buuxisay saxiixdayna, dukumiintiga xogta xiriirka u dhaxeeya adiga iyo bixiyaashaada EI.

Waxaad leedahay xuquuq badan oo la xiriirta diiwaanada qoyskaaga ee EI. Xuquuqahaas waxaa kamid ah xaqa aad u leedahay inaad:

- codsato nuqulada diiwaanada cunugaaga ee EI;
- qiimeynta iyo dib u eegista diiwaanada cunugaaga ee EI muddo 10 maalmood gudahood kadib codsigaaga;
- hesho wakiil qiimeyn iyo dib u eegis ku sameeya diiwaanada cunugaaga ee EI;
- hesho sharaaxada iyo hirgelinta diiwaanada cunugaaga ee EI;
- hesho liiska noocyada iyo goobaha diiwaanada EI da ee la aruuriyay, la kaydiyay, ama la isticmaalay;
- codsato bixiyaha adeegga EI inuu wax ka badelo diiwaanka EI ee cunugaaga; iyo
- hesho dhageysi nidaamka xaqsoorka haddii adeeg bixiyaha uu diido inuu wax ka baddelo diiwaanka EI ee ilmahaaga.

Waxaad heli doontaa nuqul ah (bilaash) go'aanka u qalmida muddo 5 maalmood gudahood ah kadib hawsha, iyo IFSP muddo 10 maalmood gudahood ah kadib kulan kasta oo IFSP. Wax lacag ah lagaagama qaadi doono dib u helida diiwaanada EI; Si kastaba ha noqotee, adeeg bixiyahaagu wuxuu kugu soo dallaci karaa khidmad ah nuqulada diiwaanka EI ee adiga laguu sameeyey haddiiba khidmadu aysan kaa hor istaageen adeegsashada xuquuqdaada la socoshada iyo dib u eegista diiwaanadaas.

Sababo la xariira qaabka dabiiciga ah ee xogta diiwaankaaga EI, dadka ka shaqeeya nidaamka EI ee heli kara macluumaadkaas waa inay u ilaaliyaan si gaara. Hay'adaha ilaaliya diiwaannada EI ee ku saabsan qoyskaaga waa inay hayaan liiska noocyada iyo goobaha diiwaanada EI ay aruuriyaan oo ay hayaan. Dadka ku jira nidaamka EI ee heli kara diiwaankaaga EI ayaa kaliya dadka kale la wadaagi kara xogta sida gaarka ah laguugu aqoonsan karo (identifiable information, PII) gaar ahaan dadka ka shaqeeya nidaamka EI iyo kaliya mararka shaacinta xogtu muhiim u tahay in qoyskaagu helaan adeegyada EI. Haddii aad rabto in PII-gaaga lala wadaago meel ka baxsan nidaamka EI, waa inaad marka hore bixisaa oggolaanshahaaga.

Si kastaba ha noqotee,  Sharciga Xuquuqda Waxbarashada iyo Asturnaanta xogta Qoyska ee soo baxay 1974 (FERPA) wuxuu u oggolaanayaa adeeg bixiyahaaga EI inuu bixiyo PII isagoon waalidku oggolaan xaaladaha qaarkood. Marxaladahaas waxaa kamid ah:

- ogeysiiska IDEA ee muhiimka ah in lala wadaago maamulka dugsigaaga iyo hay'ada waxbarashada gobalka. Tani waxay ku kooban tahay xogtaada xiriirka iyo magaca iyo taariikhda dhalashada cunugaaga;
- ururada sameynaaya daraasadaha, ayagoo matalaya, hay'ado waxbarasho iyo ururo ayna ujeedadu tahay kor u qaadista, qiimenta, ama bixinta baaritaanada qiyaasta, bixinta barnaamijyada kaalmada siiya ardayda, ama horumarinta waxbarashada;
- hay'ad ama shaqsi kasta oo uu magacaabay Kormeeraha Guud ee Mareykanka, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Mareykanka, Xoghayaha Waxbarashada, ama maamulka dawlad goboleedka ama deegaanka hoose si ay u sameeyaan hanti-dhowr kasta, qiimeyn, u hoggaansanaan, ama fulinta hawl ayadoo la raacaayo Shuruudaha sharciga federaalka ee la xiriira barnaamij kasta oo federaal ama gobol uu taageero shaqaale kiis wakaalad ama wakiil kale oo ka socda hay'ad samafal siiya ilmo kana jirta gobalka ama deegaanka marka uu qofkaasi sharci ahaan masuul ka yahay daryeelka iyo ilaalinta cunuga; iyo
- maxkamad ka jawaabaysa amar maxkamadeed oo la soo saaray ama amar garsoor.

Marka qof ka baxsan nidaamka EI uu galo diiwaankaaga EI, hay'ada haysa diiwaanka waa inay haysaa dukumiintiyada muujinaya cidda heshay diiwaanka, goorta iyo ujeeddada ay u heshay.